# Suurat Aṣ-Ṣaff

# سورة الصف

بسم الله الرحمن الرحيم

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

سبح لله ما في السماوات وما في الأرض
وهو العزيز الحكيم ﴿١﴾

1. Waxaa Ilaahay nasaha (weyneeya) waxa Cirka iyo Dhulka ku sugan, Eebana waa adkaade falsan.

يا أيها الذين آمنوا لم تقولون
ما لا تفعلون ﴿٢﴾

2. dadka xaqa rumeeyayow maxaad u sheegaysaan wax aydaan falaynin.

كبر مقتا عند الله أن تقولوا
ما لا تفعلون ﴿٣﴾

3. Waxaa Cadho weyn Eebe agtiisa ku ah inaad sheegtaan wax aydaan falaynin.

إن الله يحب الذين يقاتلون في سبيله
صفا كأنهم بنيان مرصوص ﴿٤﴾

4. Eebe wuxuu jecel yahay kuwa ku dagaallama Jidkiisa (Jihaadka) iyagoo Saf ah oo aad mooddo dhismo laysku dhejiyey (midnimadooda).

**Samaawaatka iyo Dhulkaba wax ku sugan Ilaaheen baa abuuray, isagayna ka amar qaataan wayna u khushuucaan, maxaa yeelay isagaa awood leh, kuwa Mu‘miniinta ahna waa inay wax dhab ah qabtaan oo khayr ah ee ayan sheeganin wax ayan falin, maxaa yeelay taas Eebe ma jecla'waana in Jidka xaqa ah lagu Jihaado si isku duubni ah, si gargaarka Eebe iyo nasrigiisa loo helo.**
**Rasuulkuna wuxuu yidhi (naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Calaamada Munaafiqu waa Saddex: Hadduu ballamo wuu baajiyaa, Hadduu sheekeeyana wuu Been sheegaa, Haddii la aaminana wuu khayaamaa. Waa saxiix. Aṣ-Ṣaff (1-4).**

---

وإذ قال موسى لقومه يا قوم لم تؤذونني
وقد تعلمون أني رسول الله إليكم فلما
زاغوا أزاغ الله قلوبهم والله لا يهدي
القوم الفاسقين ﴿٥﴾

5. Xusuusta markii (Nabi) Muuse ku yidhi dadkiisii maxaad ii dhibaysaan idinkoo og inaan Rasuul Eebe idiin ahay, markay xaqii ka iisheen yaa Eebana sii iilay qalbigooda,Ilaahayna ma hanuuniyo kuwa faasiqiinta ah.

وإذ قال عيسى ابن مريم يا بني إسرائيل إني رسول الله
إليكم مصدقا لما بين يدي من التوراة ومبشرا برسول

6. xusuusta marka (nabi) Ciise ibnu Maryama ku yidhi Banii Israa‘iil waxaan ahay Rasuul Eebe idiin soo diray oo rumayn Kitaabkii Tawraad ee

horreeyey, kuna bishaarayn Rasuul gadaashayda imaan oo Magaciisuna yahay «Axmed», markuu xuja cad ula yimidna waxay dheheen kani waa sixir cad.

يَأْتِي مِنۢ بَعْدِي ٱسْمُهُۥٓ أَحْمَدُ ۖ فَلَمَّا جَآءَهُم بِٱلْبَيِّنَٰتِ قَالُوا۟ هَٰذَا سِحْرٌ مُّبِينٌ ﴿٦﴾

Muslimiintu waxay rumayn Nabiyadii iyo Rusushii Eebe khalqiga u soo diray oo dhan'iyagoon kala qaadaynin'siday u rumeeyeen Kutubta Eebe ee saxa ah, waxayna Aayadahanu ina tusin in xaqu mid kaliya yahay, hase-yeeshee Gaaladu ay kala qaybiyaan si ay qaar u beeniyaan, waxaa kale oo ku cad Aayadahan in Nabi Ciise ku bishaareeyey soo bixitaanka Nabi Muxamed (naxariis iyo nabad gelyo korkiisa Eebe ha yeelee), taasina waxay xuja ku tahay gaalada Nabiga beenin. Aṣ-Ṣaff (5-6).

---

7. yaa ka dulmi badan ruux ku been abuurtay Ilaahay isagoo loogu yeedhi Islaamka, Eebe ma hanuuniyo dadka daalimiinta ah.

وَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّنِ ٱفْتَرَىٰ عَلَى ٱللَّهِ ٱلْكَذِبَ وَهُوَ يُدْعَىٰٓ إِلَى ٱلْإِسْلَٰمِ ۚ وَٱللَّهُ لَا يَهْدِى ٱلْقَوْمَ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿٧﴾

8. Waxay doonayaan (Gaaladu) inay Nuurka (xaqa) Eebe ku bakhtiiyaan Afkooda Eebena wuu taam yeeli nuurkiisa haba naceen Gaaladuye.

يُرِيدُونَ لِيُطْفِـُٔوا۟ نُورَ ٱللَّهِ بِأَفْوَٰهِهِمْ وَٱللَّهُ مُتِمُّ نُورِهِۦ وَلَوْ كَرِهَ ٱلْكَٰفِرُونَ ﴿٨﴾

9. Eebe waa kan diray Rasuulkiisa isagoo hanuun wada iyo Diin xaq ah si uu (Eebe) Diimaha oo dhan uga sare mariyo haba naceen Mushrikiintuye (Gaaladu).

هُوَ ٱلَّذِىٓ أَرْسَلَ رَسُولَهُۥ بِٱلْهُدَىٰ وَدِينِ ٱلْحَقِّ لِيُظْهِرَهُۥ عَلَى ٱلدِّينِ كُلِّهِۦ وَلَوْ كَرِهَ ٱلْمُشْرِكُونَ ﴿٩﴾

Xaqoo la diidaa waa dulmi iyo gardarro, mana aha in ruuxii xaqa loogu yeedho ka abaal daro oo diiddo beenin kala soo horjeedsado, hasa ahaatee wuxuu Eebe ballan qaaday in xaqu sare maro gaar ahaan hanuunkii uu dunida u soo saaray isagoo u soo dhiibay Rasuulkiisii Maxamed ahaa (naxariis iyo nabadgelyo Eebe korkiisa ha yeelee), ruuxa Caqliga lehna waxaa ku waajib ah in marka xaq iyo wanaag loogu yeero uu raacaa oo aqbalaa. Aṣ-Ṣaff (7-9).

---

10. Kuwa xaqa rumeeyow ma idin tusiyaa ganacsi idinka koriya Cadaab daran.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ هَلْ أَدُلُّكُمْ عَلَىٰ تِجَٰرَةٍ تُنجِيكُم مِّنْ عَذَابٍ أَلِيمٍ ﴿١٠﴾

11. Waxaad rumaynaysaa Ilaahay iyo Rasuulkiisa waxaadna ku dagaalamaysaan Jidkiisa xaqa ah Xoolihiina iyo Naftiina idinkoo u huri, saasaana idiin khayr roon haddaad tihiin kuwo wax og.

تُؤْمِنُونَ بِٱللَّهِ وَرَسُولِهِۦ وَتُجَٰهِدُونَ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ بِأَمْوَٰلِكُمْ وَأَنفُسِكُمْ ۚ ذَٰلِكُمْ خَيْرٌ لَّكُمْ إِن كُنتُمْ تَعْلَمُونَ ﴿١١﴾

12. Markaas Eebe dambigiinuu dhaafi wuxuuna idin gelin Jannooyin ay dhex

يَغْفِرْ لَكُمْ ذُنُوبَكُمْ وَيُدْخِلْكُمْ جَنَّٰتٍ تَجْرِى مِن تَحْتِهَا

socdaan Webiyaal iyo Guryo wanaagsan oo ku dhexyaalla Jannada Cadnin (nagaanshaha), taasina waa liibaan weyn.

ٱلْأَنْهَٰرُ وَمَسَٰكِنَ طَيِّبَةً فِى جَنَّٰتِ عَدْنٍ ۚ
ذَٰلِكَ ٱلْفَوْزُ ٱلْعَظِيمُ ﴿١٢﴾

13. Arrin kale ood jeceshihiinna (wuu idiin siin) waa gargaarka Eebe iyo fatxi (guul) dhaw, kuwa xaqa rumeeyeyna u bishaaree.

وَأُخْرَىٰ تُحِبُّونَهَا ۖ نَصْرٌ مِّنَ ٱللَّهِ وَفَتْحٌ قَرِيبٌ ۗ
وَبَشِّرِ ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿١٣﴾

14. dadka xaqa rumeeyow noqda gargaarayaasha Eebe sidii kuwii Nabi Ciise ibnu Maryama Saaxiibadiis ahaa (Xawaariyintii) ee uu ku yidhi yaa Eebe iila gargaara, markaas ay dheheen annagaa ah gargaarayaashii Eebe, ka dib ay xaqa rumaysay koox Banii Israa‘iil ka mid ah, kooxna ay ka gaalawday; Eebena ayiday (xoojiyey) kuwii xaqa rumeeyey (kana adkaadeen Cadawgoodii) oo iyagu ka muuqdeen (ka taliyeen) dhulkii.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ كُونُوٓا۟ أَنصَارَ ٱللَّهِ كَمَا قَالَ عِيسَى
ٱبْنُ مَرْيَمَ لِلْحَوَارِيِّـۧنَ مَنْ أَنصَارِىٓ إِلَى ٱللَّهِ ۖ قَالَ ٱلْحَوَارِيُّونَ
نَحْنُ أَنصَارُ ٱللَّهِ ۖ فَـَٔامَنَت طَّآئِفَةٌ مِّنۢ بَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ
وَكَفَرَت طَّآئِفَةٌ ۖ فَأَيَّدْنَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ عَلَىٰ عَدُوِّهِمْ
فَأَصْبَحُوا۟ ظَٰهِرِينَ ﴿١٤﴾

**Aayadahan waxay caddayn in Ganacsiga ugu khayr badani ee dambiga lagu dhaafo Jannana lagu galo uu yahay Eebe iyo Rasuulkiisa oo la rumeeyo iyo Jidkiisa oo lagu dagaallamo Xoola iyo Nafba’si loo daafaco xaqa loona helo nasri iyo Guul, lana noqdo sidii xawaariyiintii (Saaxiibadii) Nabi Ciise, Dhulkana loo hadho isagoo khayr lagu maamuli. Aṣ-Ṣaff (10-14).**

# Suurat Al-Jumucah

# سُورَةُ الجُمُعَةِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxaa Eebe nasihi (weynayn) waxa samooyinka iyo Dhulka ku sugan, Ilaahay waa xaakin Xumaan ka daahirane ah aadkade falsame ah.

يُسَبِّحُ لِلَّهِ مَا فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِى ٱلْأَرْضِ ٱلْمَلِكِ
ٱلْقُدُّوسِ ٱلْعَزِيزِ ٱلْحَكِيمِ ﴿١﴾

2. Eebe waa kan u soo bixiyey kuwaan wax aqoon Rasuul ka mid ah oo ku akhriya korkooda Aayaadkiisa «quraankana» bara iyo Sunnada

هُوَ ٱلَّذِى بَعَثَ فِى ٱلْأُمِّيِّـۧنَ رَسُولًا مِّنْهُمْ يَتْلُوا۟
عَلَيْهِمْ ءَايَٰتِهِۦ وَيُزَكِّيهِمْ وَيُعَلِّمُهُمُ ٱلْكِتَٰبَ وَٱلْحِكْمَةَ